

## **Hadda waad is baari kartaa haddaad xanuunsantahay**

**Hadda qofkii cudurka karoona  
calaamadihiisa isku arka wuu isa soo  
bari karaa. Baaritaanka waxaa laga  
dalban karaa 1177.se oo adigaa iska  
qaadaya baaritaanka. Kadib baad  
celinaysaa oo aadna ogaan doontaa  
inaad cudurka qabto iyo inkale.**

Adiga oo leh astaamaha ama calaamadaha  
cudurka karoona waad is baari kartaa  
keligaa. Haddii aad leedahay e-legitimation  
waxaanad ka dalban kartaa beyjka internetka  
ee 1177.se. Kadib qof caafimaad qaba ka  
codso inuu kuu soo qaado qalabka leysku  
baarayo.

Waxaa kuu imanaya baakad ay ku jirto  
qoriga suufka afka kuleh oo aad sanko iyo  
dhuunta isaga soo xoqeyso. Sawir baa la  
socda kuu sharxaya sidaad sameynaso. Ka  
dib qof caafimaad qaba baad ka codsanaysaa  
inuu kuu geeyo meeshii laga soo qaaday.

Jawaabtu waxaay imanaysaa muddo 48 saac  
gudahood ah. Si'aad u aragto jawaabta gal  
beyjka 1177.se markale. Haddii aad cudurka  
qabto waxaad ogaanaysaa sharciyada aad  
raacayso. Hadduu gobolku doonayo inuu  
raad raaco halka cudurku kaaga yimid  
markiisii hore, wey ku soo wacayaan.

Dadka deggan gobolka oo idil wey is baari  
karaan, haddey xannun dareemayaan.  
Waana lacag la'aan.

Haddii aadan lahayn e-legitimation oo aadan  
geli karin beyjka 1177.se wac xarunta  
bukaan socodka.

### **Kasoo qaado oona gee qalabka baaritaanka farmasiga**

Qof caafimaad qaba baa geyn kara, kana soo  
qaadi kara baaritaanka farmasiga. Qofkaasi  
waa inuu wataa kaarka aqoonsigiisa iyo  
kaagaba. Haddaad xanuunsantahay ma soo  
qaadan kartid oo mana geyn kartid  
baaritaanka. Taasi waxay keenaysaa in qof  
kale cudurka qaado.

### **Dalxiisayaalka shisheeye ee aan waddanka degeneyn ma dalban karaan baaritaanka**

Haddii uu qofku yahay dalxiise shisheeye ah  
ma dalban karo baaritaanka. Wuxuuse  
samayn karaa inuu waco xarunta bukaan  
socodka ee ugu dhaw. Waxaa keliya oo la  
baarayaa qofkii qaba calaamadaha cudurka  
oo keliya.

Markaad dalbato baaritaankaada waxaad  
kasoo qaadan kartaa dhawr farmashi oo  
gobolka ku yaal gobolka. Isticmaal kodka-  
QR-ka ee warqada ku dhegan si'aad u aragto  
farmashiyaasha aad tegi karto.

Waxaad kaloo baaritaanka geyn kartaa, kana  
soo qaadan kartaa, xarumaha bukaan  
socodka ee Vimmerby iyo Borgholm.  
Öland-na , shaqaalaha caafimaadka ee  
Lötterp baa ku baari kara.



**Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari  
doonaa.** Warqadaan warbixinta waxaa soo saara xafiiska  
arrimaha degdega ah ee gobolka Kalmar. Warqadan "waxa  
ka cusub karoona" labadii wiigba mar bay soo bixi  
doontaa xilliga xagaaga. Hadiise wax weyni dhacaan inka  
badan labadii wiigba mar bey soo bixi doontaa.

**Kalmar kommun**



[facebook.com/krissamverkan.kalmar](https://facebook.com/krissamverkan.kalmar)

# Waxaa cusub corona CORONA

SOMALISKA  
NAMBAR 12  
JUULAAY 2020

**Fiiro gaar ah! Baaritaanku wuxuu keliyoo kuu sheegi karaa inaad hada cudurka qabto. Kuuma sheegayo inuu cudurku horey kuugu dhacay, baaritaanka noocaas ah laguma samey karo gobolka Kalmar.** →

Sidan baad uga dalban kartaa 1177.se

1. Gal beyjkan [www.1177.se](http://www.1177.se) oo dooro Kalmar län
2. Riix halka ugu hooseysa beyjka "Testa dig för pågående covid-19 i Kalmar län"
3. Hoos "Anmäl dig för provtagning – så går det till" waxaa ku qoran warbixin sidaad ugu geli lahayd e-legitimation-kaada. Gal.
4. Markaad gasho: riix "Beställ provtagning covid-19"
5. Dalbo sidaad baaritaankaada kusoo qaadanayso.

Hada macluumaadkoo idil waxay ku qoran yihiin af-iswiidhish.

Kodka QR-ka ee warbixinta baaritaanka:



*Ku beeg kaamirada moobilkaada kodka QR-ka.*

## Tilmaamaha caadiga ah ee cudurka karoona waa kuwan

- Qandho/Xummad
- Qufac-qalalan
- Daal xoog ah
- Diif
- Neefsiga oo kugu adkaada
- Cabbur sanko ah
- Cuno xanuun
- Madax xanuun
- Labo labo
- Xanuun murqaha iyo laabatooyinka

Wuxuu jirkaada ku jiri karaa 3-14 maalmood.



**Labadii wiigba marbaan warqaddan warbixinta soo saari doonaa.** Warqadaan warbixinta waxaa soo saara xafiiska arrimaha degdega ah ee gobolka Kalmar. Warqadan "waxa ka cusub karoona" labadii wiigba mar bay soo bixi doontaa xilliga xagaaga. Hadiise wax weyni dhacaan inka badan labadii wiigba mar bey soo bixi doontaa.



[facebook.com/krissamverkan.kalmar](https://facebook.com/krissamverkan.kalmar)

Kalmar kommun

